Maktabada Telegramka @Somalibooks

DHIRTA III - Dhirta xabagta bixisa ama xabagta laga guro

Axmed Nuur Maanta oo khamiis ah waxay odayaasha ka doodi doonaan dhirta xabagta bixisa ama xabagta laga guro, oo ay maalin dhoweyd ka doodeen, laakiin intii ka hartay oo la xusuusto ayaa lagu sii daba kabi doonaa ama laga sii daba tuuri doonaa.
Odayaasha maanta warka qaadanaya waxaa ka mid ah: Fiqi Buraale, Saciid, Daahir Afqarshe, Dhegaweyne iyo Axmed oo isna hadalka qaybinaaya. Waxaad maantay bal wax nooga sheegtaa geedka XANDOODIBKA la yiraahdo, waxtarkiisa, siduu u egyahay iyo sida xabagta looga gurto.

Fiqi Buraale Waa tahay. Horta geedka aad ii soo qabatay ee la yiraahdo XANKOODIB, anigu sida aan u aqaan, waxa weeye sidatan soo socota: Horta marka ugu horreysa, anigu laba magac baan u aqaannaa. Waxaan u aqaannaa XANKOODIR iyo XUUBABLAHO. Labadaas ayaan u aqaannaa. Wuxuuna had iyo goorn geedkaasu u badan yahay inta dhagaxa ah ee buuraha ah ee baabacyada ah ee sanaagyada ah. Geedkaas har weyn oo la harsado ma uu laha, laamihiisuna wey feerfeeran yihiin, waana cad yahay oo foofkiisa hore wuu cad yahay. XUUBABLAHO waxa loo yiri bahanshan saaraan oo XUUBABLAHA la yiraahdo oo sidii waraaqo oo kale ah ayaa afka hore loo soo qabtaa, markaasaa saas loo soo wareejiyaa. Meeshaas laga wareejo marka diirku soo baxo, haddaad xoogaa taabato oo nabar yar ku dhifatana xabag baa ka soo baxda. Geedkaas isagu waxa weeye, sida aan u tlmaamay geedkaas buuraha ku dheehan oo had iyo goor buuraha ku dhex jira oo waa gun dheer yahay oo guntiisu wey dheer tahay oo ma gaabna oo intaas hoose oo gunta ahi gun ballaaran oo ishaysata maahan, laamo feerfeer ah buu leeyahay, caleentiisu ma balbalaarna, waxaadna moodaa sida XAGARKA, inkastoo xagarku sifa badan yahay, waxaad moodaa inay meel uun wax kala wadaagtaa geedkaas isaga ah. Waxa weeye marmarkoo waa dhirta jiilaalka baxda oo geed-abaareedka ah, waana la quwaaxsadaa, caleentiisu waxay shabahdaa tan LEBIGA. Markaa waxa weeye caleentiisu waana ku daadaa dhulka, waana raacdaa jirridaa hoose, waana isa-soo fuushaa oo intaas oo dhan waa leedahay. Waa geed xabagta aadiyo aad ugu wanaagsan, waana la cunaa. Waxaana weeye, wuxuu ka mid yahay xabagta la ururiyo ee la dhoofiyo. Intaas haddii aan wax ku sii daro, geedkaasu waxa weeye si aad iyo aad ah buu uga qaybgalaa geed-abaareed ahaanta. Xabagta sidaasuu u leeyahay, waana la dhoofiyaa xabagtiisa, waana la cunaa. Xaabadiisu marka la eego wuxuu raacsan yahay geed-quwaaxa oo ma laha raandhiis dambe oo sii raaga, dhuxushiisu waxa weeye dhuxul markiiba olosha, marka dambana baaba'da. Geedkaas caynkaas ayaan u aqaan, intaasna u dhaafi maayo. Bal odayaasha kale waxay ku dari lahaayeen, ahlan wa sahlan.

Ahmed Nuur Fiqi Buraale, waad mahadsan tahay. Horta geedka wixii laga sheegi lahaa adaa ka sheegay. Aniga kolba intaasaan ka aqaan oo labadaas maagac waanu u naqaan. Odayaasha yaa wax ku dari kara? Saciid ayaa halkaas

Maktabada Telegramka @Somalibooks

gacanta ka soo taagaya. Saciidow, bal geedkaas wax nooga sheeg.

Saciid — Waad mahadsan tahay, Axmed. Geedkaas siduu u sheegay Fiqi Buraale, tilmaamahaa uu ku shhegay ayuu leeyahay. Aniga waxaan ku darayaa in geedkaas inuu ka midka yahay dhirta aan qodaxda lahayn, waana dhirta dheerdheer oo tooska u baxda oo dhirta gaagaaban ma aha. Jirridiisa hoose waxaa weeye siday u badan tahay wey ishaysataa. Tubta marka uu tagana hoos buu u ballaartaa waana fidaa. Xabagtiisu, sida uu shegay Fiqi Buraale, waxa weeye xabag cad oo tan cadaadka oo kale ah; laakiin marka la cunaayo ama la isticmaalaayo wax yar ka dhadhan duwan tahay ama xoogaa dhadhan gooniya ayey kala leedahay, laakiin xabagta cadaadka ayuunbay u egtahay. Geedkaas waxa weeye sida uu u sheegay Fiqi Buraale, meelaha buuraha leh ayuu u badan yahay oo xoog uga baxaa.

Axmed Nuur — Anigu waxaan geedkaas ku sii dari lahaa, wuxuu ka mid yahay dhirta la SARCO ama XIJIGA la galo ayuu ka mid yahay. Waxa weeye markii la sarco ama la QOLOF-DHIGO oo la galo oo sida LUUBAANTA iyo BEEYADA loo galo oo kale ayaa isagana looga shaqeeyaa. Waxa weeye, wuu qolof dhacsadaa. Markuu qolof dhacsado oo jilab lagu sameeyo. JILAB waxa la yiraahdaa, nabar lagu dhifto, oo meeshii nabarka lagu dhifto ayaa xabagta ka soo baxdaa. Markaas meeshaas xabagta ka soo baxday, marka xabagta laga goosto, haddana dubkeedii bey qaataa, sida BEEYADA oo kale, sida BUUFOODSIGA iyo JAYCARKA oo kale ayey dubkeedii ku noqotaa. Waxad arkaysaa geedkii sannadkii hore nabarka lagu dhiftay, sannadkan nabarro ma laha. Waxaa kale ee uu yahay, geedaha xabagta oo dhan, geedka ugu xabag fiican ama ugu tira badan ama ugu macaan badan. Waxaa ku xiga geedka CADAADka ah. Wuu ka macaan badan yahay, laakiin waxaa jira nin la yiraahdo daayeer ayaan meeshuu ka baxo laga waayin. Dadku waxay yiraahdaan: geedkaas xabagtiisa wey tira badan tahay, aad iyo aad baa looga faaiidi lahaa laakiin daayeerkaasaan looga maaro heli karin.

Waxaan misna ku celinayaa ninka la yiraahdo Daahir Afqarshe oo isagu buuraha kori jiray. Bak Daahirow adna wax ku sii dar.

Aw Daahir — Anigu geedkaas waxba ku kordhin maayo. Laakiin marka aan Bari tago ayaan arki jiray sida layssugu qaandhanmayo iyo sida xxerkiisu yahay iyo sida ay dhirtu marka dame ay noqoto. Geedkaas waxa uu ka mid yahay dhirta la sarco, marka la sarcana MAGAAB yar bahal la yiraahdo oo qol yar leh oo ul yaroo gar leh oo gacanta ka celisa inaysan geedka nabar ka gaarin, ayaa dabadeed, sidaas loogu diir qaadaa. Ninka doqonka ahi wuxuu gaaraa lafta, hadduu gaarana geedku wuu dhintaa. Ninka haddii sanadkaas uusan hayan kii lahaa ee HARAADDA ka bixiyey, haddii la arko beeyada uu soo gurtay in ASAL ku jiro, waa laysku qaandhamaa, waana la isku xiraa. Mar haddaad geed la sarcaba aragto, horta caynkaas buu ka daawo yahay. Haddiise nin xariif ahi helo geedka oo dubka yar uu ka qaado, intii caanaha lahayd baa dabadeed haraagii ka baxayaa, markaasaa dabadeed geedkii markiiba isu imaanayaa oo durbadiiba bogsanaya. Haddiise, marka geedka la nabrayo, la gaaro gudaha hoose oo jirridda la taabto oo asalku dhammaado, geedka waa dhaawacmaa, dhir badanna wey ku qallashaa,

Maktabada Telegramka @Somalibooks

waana laysku helaa. Wuxuuna ka mid yahay dhirta BEEYADA laga guro.

Axmed Nuur Dhirta xabagta leh buu ka mid yahay, isaga beeyo maaha. Xabg iyo beeyo ayey u kala baxaan. Xabagtu waxaa weeye, wolow guud ahaan xabag ay wada yihiin, laakiin waxay dadka reer bariga u kala yaqaaniin FALEEN iyo XABAG. Xabagtu waxa weeye dhirta la cuno, FALEENkana waxay dhahaan dhirta aan la cunin ama la shito ama la caalashado. Marka isagu wuxuu ku jiraa dhirta xabagta ah oo xabagteeda la cuno, waana ugu tira badan yahay. Aan ka gudbo kaas. Waxaan misna dib ugu celinayaa ninka la yiraahdo Fiqi Buraale. Fiqi Buraalow geed kaloo la yiraahdo FALAX.FALAX oo dhulkeenna qiimo taariikh ku leh, weliba waagii masriyiintii horeeto lagu tilmaami jiray oo dhirta aan dhoofin jirnay ka mid ahaa, ama Hindiya aanu geyn jirnay oo dhirta aad iyo aad u qiimaha badan ah ee bal geedkaas FALAX-FALAXA la yiraahdo sida loo isticmaalo, geedka magaciisa iyo geedka siduu u egyahay, wax nooga sheeg.

Fiqi Buraale Waa tahay, Axmed Nuur. Hortageedka falax-falaxa la yiraahdo laba magac ayuu leeyahay oo loo yaqaannaa. Wixii Barigaas iyo Nugaal ah waxay badiba yiraahdaan falax-falax. Dadka kale ee reer Oogada ah ee reer hawdka la yiraahdana waxay yiraahdaan CINJIR. Marka geedkaas asaga ah waa geed aan qodox lahayn, ma laha caleen waaweyn oo balballaaran oo diirkiisu waa weyn yahay. Dhirta markaad eegto qaarna diirka waa ku dheggan yahay, qaarna sida MAREERka oo kale ayaa diirkiisu qara leeyahay, waxayna u badan tahay ciid-guduudda iyo dhulka aan dhagaxa badanna aan lahayn. Geedka falax-falaxa la yiraahdo xabagtiisa lama cuno. Hase ahaatee xabagtiisu sida koollada ayey u kala jiidantaa, meeshay qabsatana waa ku dhegtaa oo sida dhirindhirta ayey ku dhegtaa. Soomaalida waxaan ku arkay inay u isticmaasho laba xaaladood. Waa mare caanihiisa intay badiso oo hooriso oo ay kariso ayey cadhada kaga dhaydaa geela. Qoryaheedu markay engegaan waa sida geed-quwaaxa oo qoryo bac baa la yiraahdaa oo tabar ma laha, laakiin waa qoryo jilicsanoo qiicoodu udgoon buu noqdaa. Geedkaas asaga ah wuu duxaa, xabagta marka dhulka lagu dhaafo. Geedkaas waxa ka timaada caano cad oo saa u dareeraya ka yimaada oo dhulka ku da'da. Waxaanba u maleenayaa in geedkaas xabagtiisa haddii la farsameeyo inay KOOLLO noqon karto. Geedkaas waxaa loo isticmaalaa, aniga inta aan arkay, xabagtiisa oo la ururiyo oo la dhoofiyo, qoryahiis oo markay engegaan wanaagsan oo la shito, xoolaha hadday candhada beelaan oo lagu dhayo, iyo mararka qaarkood marka dhirindhir la waayo, inta maro yar la soo jeexo oo saa loogu qooyo ayaa lagaga maraa NAASAHA, si hadhow ilmaha ayan u nuugin. Inkasta uu dhirindhir yahay kan wax lagu maraa. Haddaba anigu geedkaas intaas u dhaafi maayo, waad mahadsan tahay.

Axmed Nuur Horta waad mahadsan tahay. Geedkaas labada magac oo aad ku sheegtay, labadaba waa loo yaqaan, Gobolka Bariba magacyadaas waa looga yaqaanaa oo CINJIRna waa u yaqaaniin, FALAX-FALAXna waa u yaqaaniin. Hase ahaatee, geedkaas Falax-falaxa ahi waxaa la tuhunsan yahay in Masriyiintii hore ay dadka ka dhinta meydkooda ay ku farsameyn

Maktabada Telegramka @Somalibooks

jireen oo ku kaydin jireen (MUMMIE).
Culumada qaarkeed waxay leeyihiin geedkaas waxaa laga keeni jiray Somaaliya, haddana wuu go'ay oo ma jiro oo lagumaba shaqeeyo waayo Hindiyaba waa la geyn jiray ee wuu ka go'ay oo laguma shaqeeyo. Dhulkii wuu ka baxaa, dhirtii waa ku yaallaa, laakiin laguma shaqeeyo. Ma aqaan in sababtu tahay aqoon darro iyo in SUUQ loo waayey. Waa jirtaa in marmar la dhoofin jiray oo Sinsibaar iyo Hindiya la geyn jiray. Waagii Hindiya xiriirku jiray wey weydiin jireen, laakiin anigu wax lagu sameeyo ma aqaan. Anigu waxaan tegay Masar waana soo arkay dadkii maydka mumuyaadkii, alaabtii ay geliyeen, maryihii ay geliyeen iyo alaabtii ay ku qariyeen. Marka aad aragtid geedka falax-falaxa ahi oo aad haddana aragtid geedkii ay Masriyiintii hore maydka gelin jireen waxaad isleedahay waa asagii naftiisa. Geedka Falax-falaxa ahi wuxuu leeyahay caano, sida koollada oo kale, isqabsada oo sidaas loogu dhaqmo oo cadhada lagu dhayo, oo xoolaha lagu maro; ASALna waa leeyahay labadaas calaamo waxay xoojinayaan tuhunka laga qabo in geedka ay isticmaali jireen Masriyiintii hore.
Haddana waxaan warka ku wareejinayaa Daahir Afqarshe oo alaabtaas aad iyo aad u yaqaanna.

Daahir Afqarshe — Waad mahadasan tahay. Geedkaas magacyada loo yaqaan waxaa ka mid ah CINJIR. Marka cinjirkaas waxay soomaalidu isku waafaqsan tahay jinsigiisa in RABAR laga sameeyo. Waxaan idinku kordhinayaa oo aan arkay, Nugaal dhulka loo yaqaan oo uu geedkaas ku badan yahay, geedka cinjirka ah markuu dhinto oo qallala dadka way soo burburiyaan, markaasey jawaanno ku soo guraan. Waxaan arkay dad geedkaas dhoofiya oo Awteriya u qaada.

Axmed Nuur — Waxaan ku wareejinayaa Dhegaweyne. Bal Dhegaweynow adna maxaad ku daraysaa?

Dhegaweyne — Geedkaas wuxuu ka mid yahay dhirta macduunka ah ee aan ku badnayn dhulkeenna. Meel waliba kama baxo ee wuxuu ka baxaa meelo gaar ah oo aad moodid in lagu beeray. Geedkan waxa loo yaqaan CINJIR. Markii aan yaraa, dadka waxay oran jireen geedkan waa maxay? Waa CINJIR ayaa la dhihi jiray. Geedkas wax laguma oodanayn, waxna laguma qabsan jirin oo aan ahayn in caanihiisa geela candhada lagaga dhayo. Caanihii waa la iska jiri jiray, caanihiina ma kala go'aane wey ishaystaan, meesha ay qabsadaanna kama go'aan. Dhulka marka ay ku dhacaan wey gurxamaan; marada hadday kaa qabsadaan iskama fujin kartid; riyaha, rga iyo xoolaha kale hadday hoos galaan oo harsadaan oo caanihiisu taabtaan oo ku daataan bartilmaameed bey u noqonayaan oo ka go'i mayaan. Wax meeri kara ma jiraan. Caanihiisa hadday farahaaga qabsadaan , sida qaalibka ah, kaa go'imayaan.

Axmed Nuur — Waxaan ku celinayaa Daahir Afqarshe oo asagu wax soo xusuustay.

Daahir — Waxaan soo xusuustay, riyuhu kolka ay abaarsadaan geed kasta wey

Maktabada Telegramka @Somalibooks

Afqarshe cunaan oo CINJIRka fiidiisa ayey cunaan markay wax kale waayaan, markaasey baruur la daaqi kari waayaan.

Axmed Nuur Waxaad garanaysaa geedka inuu amuureysan yahay laakiin cilmi buu u baahan yahay. Waagii Boontiyiinta iyo waagii hore wey garteen, wey dhoofin jireen geedkaas. Hadda culumada taariikhda waxay yiraahdeen geed baa Somaaliya ka bixi jiray, qof kasta magac buu ku sheegay. Waagii cilmigu uu yaraa, wax walbaa lagu sheegay geedkaas waa la dhoofin jiray. Geedkaas hadda waa laga la'yahay dhulka oo kuma yaal, haddii uu ku yaalna waa dhif. FALAX-FALAXU wuxuu ka mid ahaa dhirta ay Masriyiintii naga qaadan jireen oo LUUBAANTA, MAYDIGAna ka mid ahaayeen. Maxaa yeelay FALAX-FALAXDA markii aad aragto oo la soo diiray oo jawaanno lagu soo guray iyo FALAXDII ay ku sameeyeen boqorkii Ramsiis, maradii kafanta ahayd oo la geliyey iyo geedkii la geliyey oo hoosta loo geliyey waxaad leedahay waa kaa oo kale. Marka geedkii baan aqoon la'nahay waayo dhulka waa ka baxaa, laakiin lagama shaqeeyo, mana naqaan. Somaalidii hore waa guri jireen , aniga waxaan moodayaa afartamaadkii ka hor in la heli jiray dad ka shaqeeya Barigaa oo gurta oo keena oo dhoofiya. Boqol kiintaal iyo lababoqol kiintaal oo geedkaas ah ayaa la guri jiray oo magaalo dhan aad ku arkaysaa.
Waxaan u gudbayaa LUUFOOD. LUUFOOD waxa weeye Geedaha BEEYADA ka baxdo ayaa waxay kala yihiin LUUFOOD iyo JAGCAR. Jagcartu waa geedka dhadhaabta qabsata. Marka BEEYO iyo MAYDI bey kala yihiin. BEEYO waa kan la shito oo kaliya, MAYDIna waa kan xabagta laga dhigto. Marka tan xabagta laga dhigto geedkeeda ayaa wuxuu ka baxaa Dhuudo.
Marka waxaan uga baxayaa Daahir Afqarshe, isagaa buuraha kori jiraye.

Daahir Afqarshe Anigu sidaas waa ka duwanahay. Luufood uma aqaaniye MOXOR iyo MAYDI baan u aqaan labada geed, dabadeedna waxa iyaga laga guro uun baan FALEEN u qaannaa. Waxaan aqaan weelka xabagta lagu guro, weelka lagu qaado iyo sida loo dhoofiyo, iyo sida loo sarco. LUUFOOD ma aqaani. Waxaan aqaannaa marka MAYDIga la maqdhaco. MAQDHACU waa marka geedka la sarco ee diirka laga qaado. Geedaha marka la srco, midwaliba muddaa lagaga guraa oo laga maqnaadaa. Xabagta waxaa lagu guraa KOLAY, MAANGAABkuna waa lagusarcayaa, god baa lagu ururiyaa, waxaa lagu soo raraa CAW, waxa lagu cabirane waxaa la riraahdaa HANTAR. Marka magaalada la keenana afartii hantarba KOOBAAR baa la yiraahdaa. KOOBAARtaasaa lagu soo ridaa, iyaduna SAXAARAD weyn weeye.
Haddii la isku qasdo oo beeyada markay gurto oo ugu dambeeya, ninkii beeyada soo gurtay iyo ninkii beeyada lahaa.... jistay ee HAARAD wax la yiraahdo ku bixiyey wuxuu eegayaa beeyadii ugu dambeysay in ASAL ku jiraa iyo in kale. Kan annagu aanu tumannaa waxa la yiraahdaa FOOX. FOOXA waa geedkii markuu huray oo riixii laga soo saaray. FOOXAaddii ASAL badan lagu arko dhirtii waa la qaadanayaa, khasaareeyn baa ka dhacda oo waa la isku dilaa, guddi baa loo saaraa, ragga xeerkooda

Maktabada Telegramka @Somalibooks

yaqaan baa kala saari karaya. Haddii asalku ku badan yahay, markaas beeyadaas waxaa la garanayaa in ninkaanu isyiri ha badato uun oo uu gaaray geedka laftiisa oo uu geedkii gooyay. Markaa dabadeed khasaareeyn baa halkaa ka dhacaya. Markaa labadii nin wey isku xumadaan, xeerarka caynkaas oo kale ah ayuu leeyahay.
Bal halkaas ka sii wada.

Axmed Nuur

Horta, Daahir Afqarshe aad iyo aad baad u fiican tahay, laakiin waxaad la mid tahay ragga geela iyo gabayada oo yiri yaanu daba naal. Meeshatan erayga MAQDHACA aad ka leedahay, maaha MAQDHACA ee MAQDHACU waa deyn qaadasho. Erayga maqdhaca waannu wada naqaannay, intan oo nin baanu u tagnay, maqdhac baanu geleynaa wax na sii oo aanu xoogaa ku maqdhacanno oo aan ku wada shaqayno wey yeelaan.
Waxaa jirtay dhalashadii Nebi Ciise hal qarni ka hor ayaa nin GIRIIG ahi oo la oran jiray Albobolis wuxuu yimid Somaaliya. Ninkaasi wuxuu soo maray xeebaha Berbera iyo Saylac, goobahas magacyo kaluu u yiqiinay oo waxa ka mid ahaa Malaawi, Akalibso iyo Mandiiq. Marka uu marayey Mandiiq oo uu meesha ku tilmaamay in mayl u jiro ayuu wuxuu tegay niman maydi garaacaya, markaasuu nimankii dhegeystay oo hadalkoodii hal ka garan waayey, wuxuu uun maqlay aygoo boohaaraya, markaasuu wuxuu mooday in mayddiga naf ahaantiisa la yiraahdo boohaar. Boohaarna waa geedka lagu qiyaaso. Marka Daahirow, adiga waxaad la mid tahay ninkaas. Macnaha waxaan ka wadaa, bal horta geedaha FALEENka laga guro waa dhowr waxaana ka mid ah LUFFOD, JAGCAR iyo MOXOR. LUFOODka waxaa laga guraa geedkaas luubaanta. JAGCARtana waxaa laga guraa tan kale. Tan xabagta ah waxaa laga guraa luubaanta, mayddigana waxaa laga guraa JAGCARta.
Jagcartu isagu wuxuu leeyahay faasil oo dhadhabtuu ka baxaa, laakiin luuffodka iyo moxorka uma baahna, wey iska baxaan oo meel kasta waa ka baxaan. Waa tahay, beeyada waxay u kala baxdaa beeyo cad iyo beeyo madow.
Haddana hadalka waxaan u dhiibayaa Saciid oo isagu reer bari ahoo alaabtaas wax ka yaqaan.

Saciid

Waad mahadsan tahay jaalle Axmed. Geedka MOXORka wuu ka baxaa xataa buuraha, laakiin waxa weeye waadiyaasha uma badna, wuxuu leeyahay caleen balballaaran oo caadi ah, geedaha qodaxda lehna ma aha, sida awalba loo sheegay. MOXORka diirkiisa waa la isticmalaa oo waxaa weeye dhirta lagu isticmaalo waxa asalka la yiraahdo ama RINJI. Dadkeennu asal buu u isticmaalaa. Beeyada waxaa laga guraa geedka MOXORka loo yaqaan. Moxorkuna waxa weeye sida la tilmaamay oo diir yar baa laga qaadaa si' uu dhacaanka uga yimaado xuubkaa koraa laga qaadaa, lafta hoosana looma dhaadhaco. Moxorku waa geed-jileecoo bahal baa gelayoo horay buu ka balalayaa waa xumaanayaa. Marka geedkaas beeyada ayaa ka dhalata, beeyaduna xabag waaweyn oo is-haysata ma laha ee waxa weeye xabag gaagaaban oo xabagtiisu ma dheeraato mana

Maktabada Telegramka @Somalibooks

weynaato, madow beyna xoogaa raacsan tahay. Geedkaas moxorka ahi waa geedaha aan innagu, dadka badidiisa, FOOXA isaga yaqaan oo shidaalka ahaan la isaga shito. Marka la kala safeeyo oo xabagta rasmiga ah laga saaro ayey na soo gaartaa oo aanu shidannaa; FOOX beynu u naqaannaa oo xuub iyo xoogaa ku haray oo beeyadaa ahaa. Jagcarta waxay ka baxdaa meel dhagax ah oo siman oo haddaad geedkii sidaas u laabtid xidid ma laha. Geedkaas sal ballaaran buu yeeshaa, laakiin haddaad saan u soo qabato waa is-raacsan yahay,waa soo dhacayaa oo sal adag oo xidid weyn oo meel haysta ma leh. Waxaad moodeysaa wax meel lagu dhejiyey. Waxa weeye geed aad iyo aad qaali u ah oo xabagtiisa marka la aqdhaco la ururiyo. Xabagtiisa sida ay u badan tahay wey is-qabsataa, waana xabag cad. Xabagtaas waxaa loo dhaqaaleeyaa sida dahabka. Ninka guraaya ma rabo inay jajabto oo diirka ilaa dhulka meeshey ka haysato labada tartiib buu uga soo qaadayaa; wuxuu ku soo gurayaa shay adag oo ayan ka jajabin, HAAN buu ku soo gurayaa. Markii magaalada la keenane waa la habeeynayaa sanaadiiq ayaa loo sameeyaa, ama bahal qoryo la isugu xixiray iyo jawaan kale oo loo sameeyey ayaa lagu guraa si' ayan u jajabin. Xabagtiisu aad bey u dheeraataa, aad ayeyna qiimo u leedahay.

Aw Daahir

Mid baan ugu soo noqday oo aan aad u xasuustay oo geed qiimo badan ah. Geedkan MOXORka ah dad baa u tuugo taga reer miyiga ah oo soo gurta, asalkiisa soo jafa. Asalkiisa wax ka qiimo badan adduunyada ma jiraan oo wixii lagu xafido wuu wanaajiyaa oo jeermiskuu ka dilaa. Anigaan hal baa waraabe iga cunay, iyada oo dhaleysa oo ayaamahaaba fool ahaa ayuu halka ilma sidaha ah isku goostay ilmasidihii iyo intii u dhoweed oo dhan. Subaxxii baa la damcay in la gowraco, markaasaan reero ugu yeeray, degmo meel tuula. Markaasaan iri: kaalaya hashaan qasha. Hashii waa loo yimid, dabadeed lama qalin. Goor dambe ilmaa ka soo dhacay. Ilmihiiyoo afkiisa muuqanayo ayaa halka kan laga soo geliyey biroo oo gacan la geliyey markaasaa ilmihii la soo jiiday, ratigiiyoo cabaadaya ayaa halkan laga soo dhigay. Kolkaasaa la yiri hashatanu waxba noqon mayso, maxaa loo qalayaa. Markaasaan ratigii ka soo jiidnay. Reer nagu dhowaa baa waxaa laga soo helay asalkaas geedkaa aan sheegayo. Asalkii waa la yar tumay, meeshii dhaawacnayd baa la mariyey. Arladii dhurwaagu cunay ee uu faruuray oo ilmasidihhi bar dhan goostay. Markaa wax allaale wixii oo dhanba markaasay qallaleen. Gacanteydaan anigu ku dhayey ilaa ilmasidaha waa gaarsiiyey asalkii. Hashii wey iska kacday waase goolowday illeyn ilmaside ay wax ku qabsato ma jiree mar kale. Sannad dambe ayey ayada oo gool ah jabtay.

Axmed Nuur

Afkaaga caano lagu shub baa la oran jiray ninkii wax kuu sheega. Halkaa maqan nin kuu mariyey waa maqane ilaaliye. Horta waa runoo, jirka meelaha baruurta ah haddii nabar gaaro, somaalida waxay tiraahdaa, geedkaas oo kaliya ayaa u daawo ah oo uu ku bogsadaa. Waxaa ka mid ah GARBA-BEELKA awrta. Haddii awrtu garba-beelaan ama rati kaa garba-beelo, illaa KURUSkaa wax ka gaareene oo meeshu waa baruur, waxaa

Maktabada Telegramka @Somalibooks

lagu dhayaa geedkaas MOXORka ah asalkiisa. Haddii awrta markay dirirto oo mid midk kale kuruska ku dhegto oo goosto, oo kuruskaas nabar gaarsiiyo, kuruskaas bogsan maayo illow dhiig malehe, waxaa lagu dhayaa geedkaas asalkiisa. Xaaladdaas markay dhacdo waxaa laga adeejiyaa niman khuburo ah oo aqoon u leh. Nimankaas nabarkii bay qalayaan, markaasey waxay tumayaan xooga moxorkaas ah, waxay ku darayaan subag iyo hadi , intaas marka la isku kariyo ayey waxay ku shubayaan ama ku dhayayaan, waana ku bogsanayaa. Mariyiintii hore waa isku dayeen inay geedkaas beeraan. Haddii aad tagto macbadka MACBADU-DEYN ee XABSATSHUUT waxaad arkaysaa geedkaas oo ku beeran, waana MOXOR, geed kale ma jiro. Saddex kun sano ka hor ayey isku dayeen inay beeraan oo beeri waayeen. Geedka jirridiisa laba geed baa ku yaal oo aad loo ilaaliyo. Boqol iyo soddon iyo lix geed oo ay geeyeen ayuu ku jiray geedkaas MOXORka ah. Geedka JAGCARTA la yiraah wuxuu leeyahay asal oo waa dhirta asalka leh. JAGCARtu qodax ma laha, caleen balballaaaran buu leeyahay. LUUFOODka waa kan BEEYADU ka baxdo, buuruhuuna ka baxaa aalaaba oo uu u badan yahay; waxaana laga guraa beeyada cad. Dhulka bannaanka ah ee Sanaag hoose iyo Iskushuban iyo DHEEXdaas hoose waxaa ku badan geedka MOXORka. Halka uu LUUFOODka ku badan yahay buuraha dheerdheer, Sanaag iyo xaggaas. Geedka buuraha ka baxa waxay yiraahdeen waa beeyo cad iyo beeyo madow oo ay u kala saaraan.
Haddana waxaan ku celinayaa Saciid. Saciidow bal habka looga shaqeeyo noo sheeg.

Saciid

Waad mahadsan tahay Axmed Nuur. Geedka asaga ah habab badan baa looga shaqeeyaa. Dadku, waagii hore, dhirta waa ku xisaabtami jiray oo dhirta dhaqaale ahaan baa loogu xisaabtami jiray. Marka waagii hore degaan ahaan qaybba meel ayaa qiyaas u ahayd oo beer ahaan ugu xisaabtami jireen. Beertaas ninna waa IJAARtaa oo ijaar buu ka qaataa; ninna isagaa ka shaqeeya. Marka la samaynaayo dad baa u deyn qaata ama raasumaalkiisa u qaata. Dhowr hab baa loo kala guraa. Marka hore geedka diirka ayaa laga qaadaa oo, sidaas uu u sheegay, bir yaraa diirka lagaga qaadaa. Qofka ka shaqaynaya waxay leedahay bir yaroo daab yar leh. Birtaas ayaa geedka lagaga sarcaa meelo yaryar, markaas waxaa ka yimaada dheecaan. Dheecaankaas marka uu dhammaado oo uu engego ayaa la guranayaa. Marka la guraayo, birtii hore ee diirka lagaga qaaday ayaa loo soo qaadanayaa, iyadaasaa qolofta looga soo bixinayaa iyo dheecaankii iyo meelaha uu ku biiray. Dadka guraaya waxay sitaan DAMBIIL yar oo KOLAY la yiraahdo. Markay ururiyaan ayaa beldaanta loo qaadaa oo la dhoofiyaa.

Axmed Nuur

Horta, Saciidow, geedkaas waa geed yaab leh oo waddanka dhaqaale badan ka soo gala, kiiladiisa waxaa hadda lagu gadaa afar iyo konton doollar oo aad iyo aad bbu qaali u yahay. Marka la sarcaayo waa la nabrayaa. Waqtiga guga ayaa la nabraa si' marka uu goò uu ugu tooso xilliga deyrta. Yacni gùga awalkiisa ayaa la nabrayaa. Waxaa la soo

Maktabada Telegramka @Somalibooks

qaadanayaa bir yar oo MAYGAAG la yiraahdo, markaasaa si' saqaf ah loogu dhifanayaa oo lagu nabraa. Marka la nabro saddex toddobaad laga joogayaa, ka dib loo tegayaa qolof-rid baa la sameynayaa. Saddex todobaad oo kale ayaa misna la joogayaa, saddex toddobaad waa laga shaqaynayaa, saddex toddobaadna waa lagu gooynayaa. Markaa ka dib waxaa laga joogayaa saddex toddobaad kale, markaas ayaa waxaa la samaynayaa JILLAB oo la jillabayaa. Jillabku waa xabagta oo laga ururiyo. Xabagtii waa soo baxaysaa, laakiin ma weyna hareeraheedaa la dakhrayaa say isugu darmaan oo dheecaan kale ugu darmo. Jillabka hadduu dhammaadana waa gurud, lix bilood bey qaadanaysaa oo lixdaas bilood baa shaqada aasaas u ah. Saanadka laga shaqayo waxaa ka mid MINGAAG iyo MXMALAD(kolay). Maxmaladu nin baa qaadi kara oo garabka ku qaadi kara. Ninka buuruhuu korayaa oo haddana geed sii korayaa. Marka kolay yar oo garabka u geli kara oo aan cuslayn oo qaadi kara ilaa shan kiilo. Markuu 7 kiilo soo guro wuxuu ku shubayaa meel. Kolaygaa xabagta lagu shubo KEBED waa la yiraahdaa.

Geedkaas waa ku dheeraanay, halkaas aan ku dhaafay, waxaynu u gudbaynaa geed la yiraahdo QAROON. Qaroon waxaa laga guraa FALEENka, ayadu qiime iyo faaiido waa leedahay oo waa qaali haddi laga shaqeeyo. Qaroon haddaan ka baxo waxaan ku celin lahaa BAQOOD. Baqood waa geed la mid ah qaroonta haddana xoogaa ka duwan, sida LUUFOODka uga duwan yahay MOXORka.

Geedka BILCILka la yiraahdo isaguna waa geed geed-xbageedka ka mid, waana geed-abaareed. Waa dhirta had iyo goor magoolka ah.

Haddana waxaan hadalka ku wareejinayaa Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale — Waa tahay, Axmed Nuur. Geedka BILCILka la yiraah waa geed ka mid ah geed-qodoxeedka. Geedkaas noocyo badan yaa loo isticmaalaa oo looga shaqeeyaa. Horta haddii roob daò oo dhulka baad badan yeesho, waa geedka ay hoostiisa ka baxdo BAARTA . Geedka bilcilk ah waa la xaarxaartaa oo hooskiisa rayska ah waa lagu dhaataa.

Aw Daahir — Waa tahay. Waa isku ururay waxaadna moodaa in laama badan oo isku yimid inay ka soo abuurmaan jirriddaa hoose. Geedkaas ballaar buu u baxaa oo badiba aad uma dheeraado oo sida LEBIga iyo sida DHEERIga GALOOLka. QURACa, iyo DAMALka uma baxo, waa BILCILka . Geedkaas qodax dheer oo ku mudda ma laha, laakiin kub buu leeyahay. Wuxuu leeyahay caleen yaryar oo fiican oo markay jiilaalkii tahay manna ka soo abuurmo. Man markaan leeyahay waa ubaxii uu ka soo abuurma oo sagaaradu aad u jeceshahay iyo riyuhu; waxaana ka soo baxda DHIMBIL kale oo iyaduna jiilaalkii soo baxda oo geela waa loo laan-gooyaa, riyaha waa loo laan-gooyaa, waxbaa lagu ootaa. Waxaa jira, geel-jiruhu markuu HARUUB-GAALLAdiisa rabo inuu culo oo hogeeyo, jiliftiisuu ku hogeeyaa. Haruub-gaallada jiliftiisa lagu culay xoorkay is-qabsadaan, mrka hash lgu dhiijiyo caanahiisa haruubka lagu lisaayo. Xabagta la cuno waa laba nooc: mid waa la iska cunaa oo ma laha macaan dheexaa, midna waa macaan tahay. Xabagta CADAADka oo kale kharaar iyo macaan midna ma leh,

Maktabada Telegramka @Somalibooks

laakiin waa xabag wanaagsan oo ilkaha kuu adkeysa oo la calashanaayo. Laakiin waxaa jira laba goor oo ay xabagtu macaan tahay. Labadaa goor waxaa weeye: markay soo baxdo midina weyiska dheeraataa, midina intay fuufto ayey mirid ku yeelataa gudaha. Tan miridda gudaha ku yeelata ayaa waxay noqotaa wax macaan oo yaraha, qaarkeed haddii maroor galo dahnaan yeelata. Marka geedkaa bilcilka ahi waa geed aad u qiime weyn. Sida aad sheegtay, geed-baareedka buu ka mid yahay, qodax badanna ma laha. Xabagtiisa isticmaal badan ma laha. Hase yeeshee waa xabag ka mid ah QARAABka . Macnaha Xabagtiisa waxay ka mid tahay dhirta uu geel-jiruhu ama xoolo-raacatadu ay caanuhu iyo hilibka ku yar yihiin, ay qaraabka ka dhigtaan ayey xabagtiisuu ka mid tahay. Laakiin, bilcilku ma yeesho xabag raandhiis fara badan lahoo la dhoofiyo. Bilcilku harka waa ku wanaagsan yahay oo waa geed aad u har fiican.

Axmed Nuur — Haddana waxaan ku wareejinayaa Dhegaweyne oo wax badan BILCIL hoos fariistay.

Dhegaweyne — Geedka BILCILka ah, waddanka aniga aan ku dhashay iyo dhulka somaalidu degto, wuu ku badn yahay, waxa lagu isticmaalana asaguu u badan yahay.
Horta, waa mare xoolaha waa lagu ootaa, marka kale, dhirta xabagta leh waa ku jiraa oo xabagtiisu waa kuusan tahay, waa macaan tahay waxana lagu magacabaa DHIIGGA-BARI, guduudka ay guduudan tahay awgiis, xooluhuna waa daaqaan. Wuxuu ka mid yahay dhirta malabku galo oo aan shinnida ahayn, gaar ahaan SURTA, waana fududdahay si' malabka looga gurto. Diir buu leeyahay oo diirkiisa marka la diiro dheecaan buu leeyahy, dheecaansu waa kharaar, waa geed-qodoxeed, xoolahaa lagu ootaa. Waa geed-macaan oo dhirta xooluhu jecelyihiin oo daaqaan yuu ka mid yahay oo gaar ahaan waxaa jecel MAQASHA iyo RIYAHA. Markay HOGADA tahay wuxuu bixiyaa man jeelu jecel yahay ee daaqo. Haruub-gaallada iyo weelasha kale waa lagu culaa oo weelka lagu culaa wuxuu leeyahay, car gaar iyo caraf iyo dhadhan gooni ah. Waagii hore, dambaskiisa ayaanu timaha marsan jirnay oo wey guduudin jirtay.

Axmed Nuur — Waxaan u gudbinayaa Daahir Afqarshe, laakiin waxaan ku sii dari lahaa geed kale oo bilcilka shabaha oo la yiraahdo QAYDAR, bal inuu noo kala saaro labadaas.

Aw Daahir — QAYDARKA maba leh qodax oo isku nooc maaha, xoolahana asagu laguma oodo oo dhir ood ma aha. Bilcilkan waxa badan baad ku raagteen oo aniga waxba ku dari maayo, waxaan idin ku darayaa sheeko laga soo wariyey Shiikh Cali Cabdiraxmaan oo ku magac dheeraa Sheekh Cali Majeerteen Alle ha naxariistee.
Sheekha oo ku noolaa Marka, markii uu bokooday baa waxa u tegay dadkii markaasey yiraahdeen: maxaynu kuu doonnaa, waa adigan, waxaad tahay nin caalim ah oo xaakim ah oo wax yaqaan, daawadaada sidee u

Maktabada Telegramka @Somalibooks

raadinnaa? Dawadeydu waxay jirtaa buu yiri dhul aydaan idinku helaynin oo aydan gaareynin ee raalli ahaada. Dadkii waxay yiraahdeen: waxaynu haysanaa DOONYO oo meel walba waan mareynaa ee noo sheg waxa dawo kuu noqon kara. Wuxuu yiri: Haruub lagu culay bilcil jiliftiis oo riyo barqaday caanahood lagu soo lisay ma waad helaysaan? Markaasaa la yiri maya sheekh. Wuxuu yiri: Hal nirigtii lagaga xiray edeg, saakay markay dareertay oo la yiri yeyna daahinin oo tobankii sacadood iyadoo guuxeysa meel eeya ka soo baxday oo nirigtii markay aragtay ku godlatay, caanaheeda ma ii heli kartaan? Maya ayaa la yiri. Wuxuu yiri: arlada ay joogaanna heli maaysaane, raalli ahaada ee haddaan go'o i aasa.
Bilcilku waa geed qaali ah oo ninka doonayo uu inta magaalada ka tago, intuu shaarka iska bixiyo,gò weyn iyo macawis qaao oo shaar iyo garan la'aan intuu geela dhex seexdo oo hadba caano loo soo liso ee uu gòiisa geedka hoos dhigto raaxo ayuu leeyahay. Weelka bilcilka jiliftiisa lagu culo ayaa iska ah daawo oo udgoonkiisa waxaad ka soo raaraysaa meel fog. Bilcilka waa dhirta aan cilmigeed la aqoon.

Axmed Nuur

Aniga waxaan ku dari lahaa oo aan oran lahaa: " Xabag aan u kala qaadno: Xabag la calashado iyo xabag la shito. Xabgta la calashado waana la shitaa. Xabag milanta oo ah xabgta la hoosho oo MALMALka iyo HADIga ay ka mid yihiin oo iyadu aan la cunin, laakiin la milo oo wax lagu daaweeyo, walow xabgta kale ee la cuno ay ayaduna milanto, laakiin ayadu sida tan dhaqso uma milanto oo waa adag tahay. Xabagta XANKOODIBka iyo CADAADka wey milantaa, laakiin xabagta MALMALKA uma milanto sida taas. Marka waxaynu oranaynaa: Xabag la cuno iyo xabag xaraar. Xabagta BILCILka waxy ka mid tahay xabagta la cuno, haddana misna xoogaa dhanaan ah ku jiro. Waxaa jira geed kale oo xabagtiisa la cuno, inuu dhulkiinna ka baxo iyo in kale ma ogi. Geedkaas waxaa la yiraahdaa COBOL. COBOL waa geed xabag kulyl ah leh.
Haddana xabagta misna aan sii kala qaadno oo aan u kala qaybinno: xabag la cuno iyo xabag aan la cunin. Xabagta la cuno ruuxeeda aan labo u kala qaadno: tan la cuno oo macaan iyo mid aan macayn. Xabagta la cuno aan misna u kala saarno: Xabag BARBASHO iyo MALEEYO. Maleeyo waa xabagta markay madoobaato oo xumaato oo waxaa sii daaya QURACa.
Haddaba Daahir Afqarshe ayaan dib ugu soo celinayaa, bal inuu noo kala guro xabagta noocyadeeda.

Aw Daahir

Horta, XODAY geedka la yiraah xabag waa leeyahay, xabagtiisana waa la cunaa. Laakiin XODAYga waa geed har weynoo la harsado oo caleemo waaweyn oo waa geed-abaareed, waxaan ku bartay Hargeesa iyo aaggaas. HOBASHA geedka la yiraah xabagta waa ka baxdaa oo waa dhir waaweynoo DARAYga ku dhow dhow oo nooc gooni ah, xabagna wey leedahay. Dhirta kale oo xabagta lihi waa geed-qodoxeed. Dhirta xabagta bixisaa oo la cuno. Xabagta aan u kala qaadno xabag la cuno iyo xabag la dhhofiyo. Tan la dhoofiyaa waa qaali oo waa la iibsadaa oo dibedda loo qaadaa. Midina waa tan xaraar ee isticmaalka kale lagu sameeyo. MALEEYAna waa soo qaadnay maalin dhoweyd oo QURACaa laga helaa.

Maktabada Telegramka @Somalibooks

Maleeyo iyo malmal iyo dhuxusha khadka la isku daro inay yihiin. Kaasi waa khadka aan go'in ee aan la heli krin oo qaaliga ah oo qabta wixii bir iyo macdan ah.
Hort waxaa jirta xabag iyadu sideedaba u macaan, taasoo ah xabagta JEERINka oo aynaan weli taaban. Jeerinka xabagtiisu waa sonkor oo kale, xabagta kale waa layska cunaayoo cunto ahaan umbaad u garanaysaa inay wax kuu tarayaan oo ma macaana.

Axmed Nuur — Waxaa jirta, Daahirow, xabagtii waxaynu niri waa xabag la cuno iyo xabag wax lagu daweeyo oo xaraar. Xabagta la cunaa waa macaantahay ama waa macaan raac. Xabagta xaraar oo wax lagu daweeyo oo MALMALka iyo MALEEYAdu ka midka yihiin, xabag la calashado iyo xabag la shito, marka qofkii saddex siyood buu u qaatay: mid waa shitay weysku carfiyey oo waa luubaantii, beeyadii iyo falax-falaxii. Midda kale waa mid la calashado ama ilkuhuu ku adkeystaayoo ama afkuu ku carafsadaa. Marka qofku xabagta mid waa iska cunaa sida tan jeerinka oo kale, midna weysku daweeyaa oo waa malmalka. Xabagtu waa saddexdaa nooc.

Aw Daahir — Maantoo dhan waxynu qaraacaynay xabaal bilaash bay ahayd. Wixii xabag dhulkeenna ka baxa, geedkii ugu nacfi badnaa weynu illownay intaynu beeyo iyo wax kale ku wareegeynay. Geedkaas waxaa la yiraahdaa GUBAALI. Xabagtiisu waa murkud, waana dhirta la qariyo oo kastamyada iyo waxaa loo diidaa, dad yaqaanna ayaa dhoofiya oo kiiladii waxa la kala siistaa wax dahab oo kale ah.

Axmed Nuur — Horta dhirtaa GUBAALIda ah waa baxdaa oo Bari waa ka baxdaa. Waxaa jira geed kale oo la yiraahdo GAWLALLO. GOWLALLAda weynu naqaannaa oo ninka kabaha tola ayaa aad u yaqaanna, ayada xabagteeda lama cuno. Waxaa kaloo jira geed kale oo la yiraahdo BACARROR oo ayaduna u eg oo u dhow.
Bal labadaa geed waxaan ku wareejinayaa Saciid, Saciidoe, GAWLALLO iyo BACAROOR.

Saciid — Waa mahadsan tahay Axmed Nuur. Bacaroorka ayaamo dhoweyd inaan ka sheekaynay aan u maleynayaa. Gawlalada iyo bacaroorka isku si' uma baxaan. Bacaroorka xoogaa wey dheeraataa, caleemaheedu waa gooni, xabagteeduna waa tan aadka u qaali ah. Gawlalladu waa geed-quwaax,laakiin ma dheeraado oo waa gaaban yahay, qodax buu leeyahay oo nooc gooni ah oo taataagan,laakiin aan saas u adkeyn oo geedka ku baxda. Geedka gowlallada caleemahiisa waa caleemo yar yar oo aan saa u weynayn, wuxuu leeyahay jirrid, laamo dheerdheer ma laha oo jirrid buu u badan yahay. Xabagta ka baxda lama cuno oo waa sun. Xabag yar oo kuukuusan buu leeyahay oo anla isticmaalin, bahallada oo lagu sumeeyo mooyee. Dheecaanka gowlalladu waa caano yacni waa caddaan.

Axmed Nuur — Dhegaweynaa hal ku darsanayaa. Gawlalladu, waa runtaahoo, waa geed weyn oo ballaaran, xabagteedana lama cuno oo waxa la yiraahdaa waa

Maktabada Telegramka @Somalibooks

sun, iyada iyobacaroorkaba waa isku dhow yihiin, walow bcaroortu khatarsan tahay. Waxaan aragnaa ardada Quraanka iyo wadaaddada markay quraanka dhigayaan khadda geedka bacaroorta la yiraahdo kuma isticmaali karaan oo laga baqaa, laakiin gawlallada waa u isticmaalaan khadda iyada iyo caano intay isku daran ayey khadda ku sameystaan.

Dhegaweyne Gawlalladu waa geed dhulkeenna ka baxa oo nacfi badan.
--------- berigii hore la qaadan jiray oo faraqa lahaa oo quruxda badnaa, waxa laga bixin jiray waa gawlallada. Naaguhu markay weelkan ay haanta iyo sariiraha ugu waxaynayaan waxa ay geliyaan waa asalka gawlallada.

Xabagta gawlalladu waa kharaar oo lama dhadhamin karo. Ninka bakhaylnimo lagu xataa la oran jiray dheecaankeeduu leeyahay. Laakiin xabagta gawlallada haddaad cuntid sun maaha oo waa kharaar aan sun ahayn.

Axmed Nuur Daahir Afqarshow, horta gawlalladu waa muuqataa inayan sun ahayn oo arda ayaan ku arkay waa leefaan oo waa ku bakhti lahayd, laakiin sheekadu waxay ahayd gawlalladu waa sun, taas oo ahayd mid la isku cabsiiyo.

Aw Daahir Anigu waa diidanahay gawlallda waxbaa lagu oodaa, oo waa diidanahayxabag bey leedahay, oo diidanahay asal bey leedahay, intaba waa diidnahay. Sababta oo ah waa wax yaroo dureera oo dhedeeda ka baxda oo yar gebigeedaba, kaba tolaha nacfi bey u leedahay, ninkii ruugayey oo geeljiraha ahaa oo quwaaxsanayey nacfi bey u leedahay. Jaallahay kuwa uu mooday dhirta qodaxda leh ee xabagta leh ee xoolaha lagu ooto ee aslkeedu qarririga yahay ee maalka ka dhigaaya. Waa BIRMADA geedka uu ku khaldaayo. Waa kala laba qoys oo ma kala qaataan dabka. Xoolahana waa lagu ootaa.

Axmed Nuur Anna waxaan kugu diidanahay gawlalladu caddaad ma leh, oo waxaan kugu diidanahay gawlallada ma weynaato. Gawlalladu waa weynaataa, dhulay ku weynaataa waa jiraa oo gawlalladu aad bey u weynaataa, inkastoo aysan sida bilcilka ood fiican lahayn, laakiin Alle talo saarte markaad noqoto oo geed kale weydo, waxay leedahay ood canaan leh, oo marka la uruuriyo dhir badan baad ka gureysaa. Xabag badan bey leedahay waana xabag jirta oo horta taas waad ku geftay oo Dhegaweynaan ku raacsannahay. Xabag bey leedahay, dheecaan bey leedahay waa xabag caddahay oo xabagteedu waa weynataa. Waa adiga arkoo jillabka waa nagu badan yahay oo waxaa la yiraahdaa jillab iyo jiil oo labaduba lama kala garto. Jillabku jir ma qaato ee asal buu leeyahay. Geedka CABEEBka la yiraahdo, hadday cunaan xoolaha waa waashaan oo waa miyir beelaan, qararka buuna ka baxaa. Gawlallada anigu waxaan ku raacsanahay ninka la yiraahdo Dhegaweyne, oo waa runtiis, gawlalladu waxay leedahay xabag. Gawlalladu mararka qaarkood waa weynaataa , yaryarna waa leedahay. Isagu quwaaxa weeye tuu qalday, quwaaxu waa yar yahay, geedkaa

Maktabada Telegramka @Somalibooks

FALDHICILka la yiraahdo ama quwaaxa, faldhicilka yar oo ciidda ka baxa bacaadkaa ayaa la yiraahdaa. Gawlallada dhulka bacadka ah waa weynaataa, laamo waa yeelataa, waa runtiis, laakiin laamaheeda sida quraca, bilcilka iyo cadaadka ma aha.

Saciid — Halkaa waxaan ku sii darayaa, gawlalladu laba nooc bay u kala baxdaa, mid xoogaa wey dheeraataa oo saa uma dheeraato, laakiin ool-ool iyo geedo geedo saasay u baxdaa, ismana ay haysato oo joog joog weeye. Midna waa gaagaaban tahay oo cawska kama dheera. Qawlallada asal waa leedahay, waxay u egtahay qaroontii, jillabkii, galoolkii yacni dhirtaas badan oo wax lagu midabaysto , laakiin asalkeeda dhaaxaaba lama isticmaalo oo qaroontaa ka wanaagsan. Gawlalladu waxaa suurtowda inaysan ka bixin dhulka oo dhan. Qaroonta meel kasta oo Somaaliya ka mid ah wey ka baxdaa. Gawlalladuse meel buu u badan yahay, meel walba kama baxo, meelaha buuraha iyo dhagaxa buu ùu badan yahay, xabagna waa leedahay oo caaney leedahay.

Axmed Nuur — Waxaan u dhiibayaa Fiqi Buraale. Fiqi Buraalow waxaa la isku hayaa geedkan gawlallada la yiraahdo xabagteeda iyo nfcigeeda iyo waxay tarto iyo waxa loogu dhaqmo iyo say u egtahay iyo intay nooc ay tahay, yaa lagaa rabaa.

Fiqi Buraale — Gawlallada anigu aan aqaannaa dhulkay ku maagsan tahay, sare uma baxdoo geed dheer maaha. Xabagteedu wax ay tartaa ma jirto oo marka xataa la shidaayo qarmuun weeye, udgoon ma leh, qiic badan bay leedahay. Xabagteedu anigu sida aan u aqaan wax faaiido ah ma laha. Waa la quwaaxsadaa oo quwaax baa laga dhigtaa, oo biyey leedahay, marka la harraado ayaa bahashaa gawlallada ah inta la gooyo la calashadaa oo quwaax laga dhigtaa. Marka waa geed-quwaax, waana gaaban tahay, caleen bey leedahay yar yar, xooluhu wey cunaan, oo weliba waxaa u badan ariga oo geela maba cunaba haddii ayan naf ku khasbin. Riyaha, waxaraha iyo idaha yaa cuna. Gawlalladu xididdana wey leedahay, kuwa hoos u aroora iyo kuwo firdhaba, laakiin baar dheer oo baxa kuma aqaan. waxayna u badan tahay meelaha laagaha iyo babacyada ah. Waa caddaan sida xuubablaha, jil bayna leedahay, sida xuubablaha marka xuubka laga qaadayo quwaaxiisa oo madax weyn bay leedahay oo la falfalliiro. Taas ayaa anigu gawlallo u aqaannaa. Hadday dani kaa maaransiin weydo waa asal fiican oo weliba tan xagarka u eg, waxna waa lagu ootaa iyada marka la wada rujiyo yaa saa loo soo jiidaa oo saa wax loogu gembiyaa.

Dhegaweyne — Horta, Gawlallada geedka la yiraahdo, dhirta waa kala qaalisan tahay, dhulka Ilaahay dhirtiisu waa kala qaalisan tahay, gawlallada hawdka nooga baxa oo arladayada ka baxa waa wwweyn. Gawlallada intay laalaad tahay, salkaad ka gooynasaa, waa buuran tahay oo argaba ma soo mari karo, waa la quwaaxsadaa oo dheecaanka yaroo korana waa kharaar, dhuuxa markaad u dhacdana waa macaan oo waa quwaaxsn jirnay markaynu

Maktabada Telegramka @Somalibooks

harraadno. Gawlallada xabagtiisana waa tan ardada khadka ay wax ku qorato ka dhigato, xididdadana waa leedahay oo waa guduud. Quwaaxeedu waa macaan yahay. Horta, gawlalladu waa geed wax lagu ooto, asaslkiisu waa kulul yahay. Naaguhu, markay haragga geliyaan asalka gawlallada, markiiba muluq bey ka siiyaan dhogorta. Geedka gawlallada la yirahdo ha igu qabaninna oo weligey baan dhex taagnaa.

Axmed Nuur — Daahir Afqarshe waa soo noqday,sababtoo ah usagu wuxuu joogi jiray dhulkaa Sanaag oo iska khafiifka ah. Dhulka qaarkii waxaad ku arkaysaa geed gawlallo ah oo laba kun sano iyo ka badan jira. Ma aragtay, quraca meelna waa yaryahay meelna waa weyn yahay. Waxaa kaleetoo aan ku daraynaa malmalka mar mar ay ku qaldaan muraha hadiga, nimnka tuugada ah oo qasaase, xabagteeda xabagta hadigey u egtahay; ha u ekatee wey ku daraan. Laakiin nimanka yaqaan waa ka soocaanoo waxay yiraahdaan xabag gooniyaa ku jirta, iyadu wey caddahay oo wax ma tarto sida xabagta hadiga,laakiin wey ku qaldaan, haddaaad cuntana wax ku gaari maayaan.
Waxaan ku celinayaa geed asagu la yiraaho JEERIN oo isagu mirana leh, misna wuxuu leeyahay xabag. Marka waxaan ku hor marinayaa Fiqi Buraale oo asagu reer ciideed ah, bal jeerin oo laba faaiido leh, miro iyo xabag.

Fiqi Buraale — Horta geedka JEERINka la yiraahdo wuxuu leeyahay qodax, haddii ay ku muddo, aad u xun. Qodaxdiisu xoog bey leedahay oo hadday ku muddo waa khatar. JEERINka laba qaybood buu u kala baxaayoo; xabagtiisu xabag sas raandhiis u leh maaha, laakiin geel-jiraha wuxuu u yaqaan KAC-FARIISO. Marka xabag badanoo sida CADAADka, QURCa, GALOOLk ah ma laha, laakiin asga xabag lagama waayo. Jeerinka wuxuu kaluu leeyahay miro oo mirahiisa waxay u egyihiin sida kuwa QUULLAha oo sida DHIMBIIsha u baxa oo sida quullaha ayaa loo dubtaa. Geedka jeerinka wayraxna waa laga dhigtaa.

Axmed Nuur — Horta, Fiqi Buraalow, geedka la yiraahdo jeerinka, QUULLE waa miro nooca jeerinkey ka baxaan.
Waxaan u gudbinayaa Saciid oo reer ciideed ah.

Saciid — Waa mahadsan tahay Axmed. JEERINku, sida uu u sheegay Fiqi Buraale, waa geed qodax kulul oo qodaxdiisu waxay u baxdaa sida tan quraca, gololka, iyo SARMAANTA. Qodaxdiisu waa laba faraq oo kala geddisan. Jeerinku waa dhirta dhulka ku fidda oo kor uma dheeraado; caleentiisuna waa yar yar oosida quraca ayey u baxdaa, laakiin waa ka caleen fidsan yahay. Jeerinku wuxuu racsan yahay geed caddan, geed sal weyn leh ma aha, laamihiisa meel bey ka wada unkamaan oo salkay ka unkamaan oo miruu leeyahay iyo xabag. Mase xabag badna laakiin xabag macaan buu leeyahay. Mirahiisa makay cucurrada yihiin waa la dubtaa oo hah bay leeyihiin. Diirkiisa mayrax baa laga dhigtaa. Mirahiisa hadday qallalaan aad bay u adag yihiin, waana kuuskuusan yihiin oo sida DIGIRTA ayey u

Maktabada Telegramka @Somalibooks

egyihiin, waana laba dhambal.

Axmed Nuur Waxan u dhiibayaa Daahir Afqashe oo wax badan geedkaas gurtay oo geel-jire ahaan jiray.

Aw Daahir Mahadsanid. Sida loo sheegay, jeerinku waa geed aan sare u bixin. Waa geed ay dhuumataa sagaarada oo ay hoostiisa gasho. Waa geed Ilaahay ku asturay oo ay harsato oo ay miraha iyo caleenta ka cunto. Xabagtiisa waa macdahay.